

Välkommen!



Ku soo-dhowoow!

Xarunta qoysaska

– oo ah goob waalidiinta iyo
ilmaha ay ku kulmaan.

Waalidiinta waxay xarunta qoysaska ka heli karaan talo iyo taageero, oo xiriir la leh arrimaha kala duwan iyo fursad ay kula kulmaan waalidiin kale oo kaddib is-waydaarsadaan khibrahada. Isla goobta waxaa ku yaallo dugsiga xannaanadda oo albaabada u furan. Waxaa kaloo goobjoog ah shaqaalaha rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta, rugta daryeel-caafimaadeedka hooyoyooyinka iyo xannaanadda shaqsiyaadka iyo qoysaska (Maamulka adeegga bulshada). Dartaada ayaa halkaan ugu sugar nahay.

Waa goob waalidiinta adigoo kale ah ay ku kulmaan

Waa goob loogu talagalay dhammaan waalidiinta ilmaha, da'dooda u dhaxayso 0-6 sano. Booqashada goobta waa lacag la'aan. Hawlwadeneyada halkaas ku sugaran waxay leeyihin xirfado kala duwan. Wuxaan su'aal laga waydiin karaa arrin kasta – sida walwalka laga qabo caafimaadka iyo korniinka ilmaha ama kuwa ku saabsan dhibootoyinka la xiriir noolol-maalmeedyada. Hawlwadeneyada waxay mar kasta heegan u yihiin in waalidiinta ay taageero siiyan, oo ay xarunta ku soo dhoweeyaan. Xitaa haddii ay u baahan yihiin oo keliya wehel iyo qof ay shaah-qaxwo la cabbaan.

Qofka waalidka ah wuxuu xarunta qoysaska ka helayaa:

- Fursad u ku la kulmo waalidiin kale
- Fursad u ku la kulmo shaqaale tababarsan oo laga helo talo iyo taageero
- Goob u qaxwo/shaah ku cabbo
- Goob ay ilmaha ku cayaaraan
- Goob uu ka qaybgalo dhaqdhaqaaq kala duwan



Gundhingga xarunta qoysaska

Dugsiga xannaanadda albaababada u furan [Öppna förskolan]

Dugsiga xannaanadda albaababada u furan
waxay ilmaha ka helayaan goob ay ku cayaaraan
oona wax ku bartaan. Waalidiinta waxay goobta
ka helayaan taageero ay waalidnimada ku gutaan
yo fursad ay waalidiin kale ku bartaan.

Booqashada kahor ballan qabsasho looma
baahna. Waxaa goobta la booqan kara lagana
dhaqaaqi karaa saacadaha ay furan tahay. Waalid
kasta wuxuu mas'uul ka yahay ilmahiisa goobta
ku sugaran. Hawlwadeneyada waa macalimiin,
waxayna mararka qaarkood qorsheeyaan
dhaqdhaqaaq, sida tusaale in la wada heeso.

Rugta daryeel-caafimaadeedka
carruurta [BVC]/ Rugta daryeel-
caafimaadeedka hooyooinka
[MVC]

Wawlwadeneyada waa
kalkaalisooyinka caafimaadka
carruurta. Waxaa iyaga lagala
xiriiri karaa arrimaha xiriirka
la leh uur-qaadid ama
caafimaadka iyo horumarka
ilmaha, sida tusaale arrimaha
hurdada iyo raashinka.



Xannaanadda shaqsiyaadka iyo qoysaska [Individ- och familjeomsorgen]

Waalidkii su'aal ka qabo arrimaha kala duwan ee xiriirka la leh noolol-
maalmeedyada iyo xaaladaha qoyska ama doorka waalidnimada, wuxuu la xiriiri
karaa hawladdeneyada Xannaanadda shaqsiyaadka iyo qoysaska [Individ- och
familjeomsorgen] ee maamulka adeegga bulshada. Hawlwadeneyada waxay aqoon u
leeyihiin arrimaha bulsha, waxayna waalidiinta ka caawini karaan sidii ay xiriir ula
yeelan lahaayeen hay'adaha kale ee dowladda ama helida warbixin kale ee bulshada
xiriir la leh.

Xarunta qoysaska degmada Köping

Adreeska booqashada: Esplanaden 8, daarta ku taallo agagaarka maxkamadda.
Labada dhinac ba waa laga soo gala.

E-mail marita.rosendahl@koping.se

Lam. tal. 0221-254 16
Saacadaha ay furan tahay



waa wadashaqaynta rugta daryeel-caafimaadeedka Ullvi Tuna, Achima Care iyo dhakhtarka qoysaska Byjorden.